

## **Khabiirada oo Khibrada leh: Talooyinka baabuur wadidda Cabdullaahi**

Cabdullaahi wuxuu ku imaaday UK sida qaxooti Suuriyaan ah ee 2017 isaga oo keliya garanaayo dhowr kelmadood oo Ingiriisi ah oo waxaa soo dhoweeyay kooxda CHARIS Community Sponsorship Group ee Koofur Galbeed. 10 bilood kadib, waxuu ku baasay fikirkiisa iyo imtixaanada wadista baabuurta ee wax ku oolka ah, isaga oo la siinaayo madax-bannaani iyo xorriyad muhiim ah.

Markii uu imaaday UK, Cabdullaahi wuxuu haystay shatiga baabuur wadista oo sax ah ee Suuriya ah, kaas oo uu kuwadi karo hal sano ka hor inta uusan ku guuleysanin imtixaanka baabuur wadista ee UK. Cabdullaahi waxuu ku noolyahay magaalo yar ee ku taalo UK oo wuxuu si dhaqso ah ku ogaaday inuu u baahan yahay gaari sidaas darteeda gaadiidka dadweynaha uu ka baxsan yahay bartamaha magaalada oo xadidan yahay sidaas awgeed wuu oгаа inuu sii wado wadista gaariga wuxuu u baahan doonaa si uu u bilaabo xoogana uu saaro barashada Ingiriisiga iyo barashada loogu talagalay aragtida imtixaanka isla markiiba. Labo bilood ka dib oo uu joogay UK, waxuu bilaabay inuu barto maalintiiba saddex saacadood, ee uga yaraan saddex beri usbuuciiba saddex bilood. Cabdullaahi waxuu helay in adeegsiga barnaamijka turjumaadda ah oo loo sameeyay imtixaanka aragtida ee loo yaqaano ABEL Drive for Life ayaa ka caawisya si uu ugu turjumaano su'aalaha Carabi. Tani waxay u fududeeysay isaga inuu su'aalaha ku akhriyo Ingiriisi ahaan oo ka dibna u dhageysto Carabi ahaan marka uu wax baranaayo.

Cabdullaahi wuu xasuustaa, "waxaan ku guuleystay imtixaanka aragtida wareega labaad. Runtii way i caawisay inta lagu guda jiray imtixaanka si aan u xirto sameecada dhegaha oona u dhageysto su'aalaha sidoo kale aan u akhriyo iyaga. Qaabkani haddii aan aqoonin erayga qoran, waxaa laga yaabaa inaan fahmo isga marka aan maqlo. Waa inaad horey u codsataa haddii aad rabto inaad dhageysato imtixaanka sidoo kale akhriska. Xaqiiqdii waxaan kula talin lahaa midkaan qof kasta oo weli baranaayo Ingiriisiga. Si aad u cadeyso – waxaad keliya ku dhageysan kartaa imtixaanka Ingiriisiga, luuqadaada koowaad ma ahan."

Intaa waxaa dheer inuu wax ka baranaayo imtixaanka aragtida, Cabdullaahi wuxuu qaataa 12 saacadood ee casharada baabuur wadista si uu ugu diyaar garoobo imtixaanka wax ku oolka ah halkaas oo uu ku fahmi lahaa tilmaamaha imtixaan qaadayaasha. Casharada baabuur wadista ma ahayn kuwo raqiisa ah sidaas darteeda CHARIS waxay codsatay deeq ka timid Goldman Sachs oo loogu talagalay £500 kaas oo daboolaaayo dhammaan casharada iyo imtixaanada. Cabdullaahi wuxuu xoogahoo talo u hayaa qaxootiyada kale kuwaas oo jeclaan lahaayeen inay

sii wadaan ama bilaabaan baabuur wadista ee UK gadaheeda. “Qaxootiyada kale, xasuusnaw inaad u baahan doonto in midaan si dhab ah u sameyso oo aad si adag wax u barato. Haddii aad shaqada qabato, waa la bixin doonaa. Haka caajisin haddii aadan ku guuleysanin marka koowaad, keliya dadaalka sii wad.”